



## Tusaaleyn qofka uu taabtey cudurka koronuhu

- Dhakhtarka qaabilsan cudurada faafa ayaa kugu amrey in aad karantiin gashid.
- Waxaad la joogtey qof cudurka koronaha u jiran, sidaas awgeed waxaa suurtoagal ah in aad qaadey cudurkaas koronaha.
- Qofka uu cudurkaasi taabtey wuxuu karantiinka ku jirayaa muddo 14 caano maal ah.
- Karantiinka markaad ku jirtid:
  - Iska ilaali wax xidhiidh ah oo lagama maarmaan ah in aad la yeelatid qoyska intiisa kale
  - Uma dhawaan kartid dadka banaanka ka ah qoyska. Waad tagi kartaa banaanka, mar haddii aad dadka kale u jirsaneysid masaafad 2 metir dhan.
  - Ma tagi kartid tusaale ahaan shaqada, dukaanka, suuqyada ganacsiga, farmasiga, timo jaraha, jimicsiyada/ meelaha maararowga, kaniisada, masaajidka ama meelaha meelahaas u dhigma, sababtoo ah wey adag tahay sida meelahaas oo kale dadka looga fogaado ama la isaga ilaaliyaa.
  - Ilmaha ama dhallinyaradu ma tagi karaan xanaanada ama iskuulka. Qofka weyn ee karantiinka ku jiraa ma shaqo tagi karo.

Calaamadaha tilmaamaya cudurka koronuhu waa:

- madax xanuun
- urta- ama dhadhanka oo khalkhal gal
- hargab, sanko oo ku cabudha
- qufac
- neefta oo ku qabata
- tamar la'aan, daal
- murqo xanuun
- dhuun xanuun, xabeeb cunaha ah
- xummad
- lalabo, matag
- shuban

Haddii aad yeelato calaamadaha ku haboon korona feyraska, wac oo ka qabso ballan baadhitaanka koronaha:

- Telefoonka la talinta koronaha ee Turku, t. **02 266 2714**
- Iskuulak- iyo daryeelka caafimaadka waxbarashada telefoonka la talinta koronaha t. **02 266 2012**
- Heeganka wadar ahaaneed ee agagaarka Turku, t. 02 313 8800
- Sabtida iyo axada heeganka caawimaada t. 116 117

Haddii aad ku khasbanaatid in aad dhakhtarka tagtid, isticmaal af iyo san daboolka ama ku dabool afkaaga iyo sankaga maro aad hal mar isticmaalka ka dib tuureysid.

**Wixii warbixin dheeraad ah ee mowduuca la xidhiidha:**

[www.turku.fi/korona](http://www.turku.fi/korona)

[www.turku.fi/se/corona](http://www.turku.fi/se/corona)

[www.turku.fi/en/corona](http://www.turku.fi/en/corona) (included Google Translator)